**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.190** **Taariikh: 21 Jan, 2026**

**<u>XEERKA:</u> <u>XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA ADEEGYADA SHARCI</u>**

XRW - BIXIT
25 JAN 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad farqadaha 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad farqadaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Sharciga Qareenada (Sharci Lr. 3/1986).

**Markuu arkay:** Warqadda summaddeedu tahay **WC&AD/XW/2629/26** ee ku taariikheysan **16/11/2025** ee Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka kuna saabsan codsiga soojeedinta **Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci ;**

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.02.142.1.26** ee **12/1/2026,** kuna saabsan Ansixinta **"Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci "** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgeliyay:** Muhiimadda Xeer-nidaamiyahan u leeyahay Hubinta & bixinta adeeg sharci .

**Wuxuu Meelmariyay**

**<u>Qodobka 1aad</u>**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.02.142.1.26** ee **12/1/2026,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

## Qodobka 2aad
## Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka loo igmaday in ay hirgaliso meelmarisana Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 3aad
## Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahan waxaa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS.**

**Ref: WC&AD/XW/2629/11/2025** **Date: 16/11/2025**

Mudane Ra'iisul Wasaare,

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA ADEEGYADA SHARCIGA"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Xukuumadda JFS waxay halkan ku soo gudbinaysaa **"Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharciga"**, waxaa uu qeyb ka yahay Hawlaha hortabinta u leh Xukuumadda dan-qaran ee lagu horumarinayo Mihnadda Sharciga isla markaasna kor loogu qaadayo tayeynta iyo sare u qaadista adeegyada sharciga.

Mudane Ra'iisul Wasaare, Xeer-nidaamiyihaan wuxuu xoojinayaa hawlaha mudnaanta u leh Xukuumadda JFS ee ku aaddan horumarinta Mihnadleyda Sharciga si loola jaanqaado loona nidaamiyo habka casriga ah ee dunida qaadatey.

Haddaba, waxaan rajeynaynaa inaad si xushmad leh nooga aqbasho, lana horgeeyo Golaha Wasiirrada si ay u ansixiyaan.

Mahadsanid

Mudane: Xasan Macallim Maxamuud Sh. Cali
**WASIIRKA CADAALADDA & ARRIMAHA DASTUURKA**

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS =Muqdisho=
Og: Xafiiska Agaasinka Golaha Wasiirrada =Muqdisho=

**Summad: XGG/392/2025** **15/11/2025**

**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirradda** **Muqdisho**
**Ku: Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Dastuurka** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo:** Talo Sharci

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WCAD/XAWSH&H/2590/2025** ee ku taarikheysan **10/11/2025** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, ujeedadeeduna ahayd: **Soo gudbin "XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA ADEEGYADA SHARCI"**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si Waafaqsan **Sharci Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idin kugu soo gudbinayaa Xeer-nidaamiyaha sare ku xusan oo ay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Haddaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda kadib markii uu darsay Nuqulka Xeer-nidaamiyahani ee lagu horumarinaayo mihnadda qareenimo, shirkadaha adeegyada sharci bixiya iyo keydinta diiwaanka shirkadaha qareennada, kuna sameeyay toosin iyo sixid aan looga maarmin, islamarkaana waafijayay Shuruucda Dalka, ayaa waxa uu Xafiisku ku talinayaa in Xeer-nidaamiyahan, loo gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama uusan kahor-imaaneyn Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.

Ugu dambeyn, Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasiirrada in nuqulka ku lifaaqan warqaddan uu yahay nuqulka asalka ah ee loo gudbinaayo Golaha Wasiirrada sii ay u meel-mariyaan si waafaqsan **Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125 ee 06 April 2023.**

**FG: Waxa halkan ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.**

**Adv. Xasan Axmed Caamir**
**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA ★ OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL ★ مكتب المحامي العام للدولة

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
**Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada**

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والا تفاقيات

**Federal Republic of Somalia**
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
**Office of Director Legislations and Agreements Department**

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2590/2025** **Tr. 10/11/2025**

**UJEEDDO: SOO-GUDBIN "XEER-NIDAAMIYAHA SHIRKADAHA ADEEGYADA SHARCI "**

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, waxa ay halkan ku soo gudbinaysaa "Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci" oo abuuraya hannaan sharci iyo mid maamul oo lagu nidaamiynayo shirkadaha bixiya adeegyada sharci.

Xeer-nidaamiyahani waxa uu qeyb weyn ka qaadanayaa horumarinta mihnadda qareenimo iyo shirkadaha adeegyada sharci iyo keydinta diiwaanka shirkadaha qareennada.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa in uu ka guto waajibkiisa sharci ee ku aaddan xeer-nidaamiyeyaasha si habraaca ansixintu u dhammeystirmo.

Wada-shaqeyn wacan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADDAALADDA IYO DASTUURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTION
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Mudane Abdulkadir Mohamed Sheikh
**Ku-simaha Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Caddaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka =Muqdisho=

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 11/11/2025

Dr. Dacar, Camir iyo Cawrale
11/11/2025

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
## WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA

# XEER-NIDAAMIYAHA
# SHIRKADAHA ADEEGYADA SHARCI

***Waxaa diyaariyay: Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka 2025***

# TUSOMO


Qodobka 1aad: 3

Magaca Xeer-nidaamiyaha 3

Qodobka 2aad: 3

Qeexitaanno 3

Qodobka 3aad: 3

Ujeeddo 3

Qodobka 4aad: 4

Baaxadda 4

Qodobka 5aad: 4

Shuruudaha Lahaanshaha Shirkad bixisa adeeg sharci 4

Qodobka 6aad: 4

Shakhsiyad Qaanuuneed 4

Qodobka 7aad: 5

Diiwaangelinta Shirkadaha 5

Qodobka 8aad: 5

Xogta iyo Dokumentiyada Diiwaangelinta 5

Qodobka 9aad: 6

Dhisid iyo Diiwaangelin Shirkad Shisheeye 6

Qodobka 10aad: 6

Shirkadaha Horey u Jiray 6

Qodobka 11aad: 7

Faafinta Liiska Shirkadaha Adeegyada Sharciga 7

Qodobka 12aad: 7

Cusboonaysiinta Diiwaangelinta 7

Qodobka 13aad: 7

Kormeer 7

Qodobka 14aad: 8

Anshax-marin 8

Qodobka 15aad: 8

Xilliga Kala-guurka 8

Qodobka 16aad: 8

Dhaqangal 8

## Qodobka 1aad:
## Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa **"Xeer-nidaamiyaha Shirkadaha Adeegyada Sharci".**

## Qodobka 2aad:
## Qeexitaanno

1. **Shirkad:** waxaa loola jeedaa shirkad bixisa adeeg sharci oo lagu diiwaangeliyey si waafaqsan xeernidaamiyahan, ama shirkad bixisa adeeg sharci oo horey u jirtay oo la waafajiyay xeernidaamiyahan;
2. **Adeeg Sharci**: waxaa loola jeeda adeegyada ay bixiyaan qareennadda si waafaqsan Sharciga Qareennada Sharci Lr. 85 ee soo baxay 21 Oktoobar 1975 iyo wax-ka-beddelkiisa Sharci Lr. 3 ee Janaayo 1986
3. **Wasaarad:** waxaa loola jeedaa wasaaradda Cadaaladda. JFS
4. **Wasiir:** waxaa loola jeedaa wasiirka u xilsaaran arrimaha Cadaaladda.
5. **JFS:** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Fedaraalka Somaaliya.
6. **ALBA:** waxaa loola jeedaa diiwaanka lagu keydiyo qareennada si waafaqsan qodobka 7aad (1) ee Sharci Lr. 85 ee soo baxay 21 Oktoobar 1975.
7. **Rukhsad Qareen:** waxaa loola jeedaa rukhsad qareennimo uu bixiyo Guddiga talabixinta iyo diiwaangelinta qareenada laguna qoro diiwaanka ALBAHA.
8. **Qareen:** waxaa loola jeedaa Sharciyaqaan ku hawlgala mihnadda qareennimo, isla markaana ku qoran Diiwaanka Guud ee Qareennada (ALBA) ee yaala Maxkamadda Sare.
9. **JFS:** waxaa loola jeeda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

## Qodobka 3aad:
## Ujeeddo

Ujeeddada Xeer-nidaamiyahan waa:

1. Dejinta nidaam lagu diiwaangeliyo shirkadaha bixiya adeegyada sharci (Law Firms).
2. Ku Xaddididda adeegyada qareennimada inay bixiyaan keliya qareennada heysta rukhsad qareennimo.
3. Ilaalinta madaxbannaanida iyo hufnaanta xirfadda qareennimada.

## Qodobka 4aad:
## Baaxadda

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dabaqayaa;
Shirkadaha bixiya adeegyada sharciga ee uga diiwaangashan gudaha JFS qaab shirkadeed una hawlgala ujeeddooyin la xiriira bixinta adeegyo sharciyeed.

## Qodobka 5aad:
## Shuruudaha Lahaanshaha Shirkad bixisa adeeg sharci

1) Hal qareen ama ka badan oo heysta rukhsad qareen si waafaqsan sharuudaha iyo habraacyada Sharciga Qareennada Sharci Lr. 85 ee soo baxay 21 Oktoobar 1975 iyo wax-ka-beddelkiisa Sharci Lr. 3 ee Janaayo 1986 ayaa keliya leh xaqa asaasidda iyo hawlgelinta shirkad bixisa adeeg Sharci gudaha JFS.
2) Qof aan heysan rukhsad qareen looma oggola in uu furto ama lahaado shirkad bixisa adeeg Sharci, fal kasta oo noocaas ah waxaa loo aqoonsanayaa ku shaqeyn sharci darro oo lagu muteysanayo ciqaab si waafaqasan qodobka 383 iyo 496 ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## Qodobka 6aad:
## Shakhsiyad Qaanuuneed

1. Shirkad sharci oo lagu diiwaangeliyo si waafaqsan xeernidaamiyahan waxay yeelanaysaa Shakhsiyad qaanuuneed ay ku dacwoon karto laguna dacweyn karo, islamarkaasna ay ku geli karto heshiis sharci.
2. Shirkad sharci waxaa loo magacaabi karaa maamule ama hawlwadeen farsamo oo aan qareen ahayn, si gaar ahna loogu xilsaaray hawlaha maamulka maaliyadeed, maamulka shaqaalaha iyo hawlaha farsamo ee aan toos ugu lug lahayn bixinta adeeg sharci ee mihnadeed.
3. Maamule ama hawlwadeen lagu hawlgeliyo si waafaqsan ujeeddada ku xusan faqradda (2) ee qodobkan, looma aqoonsanayo inuu leeyahay awood sharciyeed oo ku saabsan bixinta adeeg sharci, dacwad, difaac, heshiis ama hawl kale oo leh dabeecad adeeg sharciyeed, mana fulin karo adeeg kasta oo fulintiisu u baahan tahay rukhsad qareen.
4. Layli qareen ama kaaliye sharci waxaa loo oggol yahay in uu qabto oo keliya hawlaha uu si toos ah ugu xilsaaran yahay inuu ka hoos shaqeeyo qareenka, iyadoo mas'uuliyadda sharci iyo mihnadeed ee hawlahaas si buuxda iyo si kama dambeys ah u saaran tahay qareenka.

## Qodobka 7aad:
## Diiwaangelinta Shirkadaha

1) Ka hor inta aan la hawlgelin shirkad bixisa adeeg sharci oo cusub, waa in laga diiwaangeliyaa Wasaaradda.
2) Waaxda Arrimaha Garsoorka ee Wasaaradda ayaa diiwaangelinaysa si waafaqsan xeer-nidaamiyahan, iyadoo lagu lifaaqayo dokumentiyada ku cad Qodobka 8aad ee Xeer-nidaamiyahan.
3) Xog kasta oo la gudbinayo waa inay noqotaa mid sax ah oo dhammeystiran.
4) Marka la xaqiijiyo u hoggaansamidda shuruudaha ku xusan iyo bixinta khidmadda loo qoondeeyey, Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Shahaadada diiwaangelinta oo leh Lambar diiwaangelin oo taxane ah; shahaadada waa in si muuqata loogu dhejiyo xafiiska shirkadda.
5) Isbeddel kasta oo ku yimaadda magaca shirkadda, cinwaanka, qaabka lahaanshaha ama liiska qareennada rukhsadda heysta ee asaasayaasha ama saamile ah waa in lagu soo wargeliyaa Wasaaradda muddo shan iyo toban (15) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda isbeddelka.
6) Soo gudbinta xog qaldan ama ka gaabinta buuxinta shuruudahan waxay keeni kartaa diidmo diiwaangelin, hakinta ama tirtiridda diiwaangelinta iyo in laga qaado tallaabo sharci si waafaqan Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 8aad:
## Xogta iyo Dokumentiyada Diiwaangelinta

Codsi kasta oo diiwaangelin ah waa inuu la socdaa dokumentiyada iyo xogta soo socota:

1. Codsi qoraal ah oo lagu caddeeyay magaca shirkadda, qareenka, ciwaanka rasmiga ah iyo goobta hawlgalka oo uu ku saxiixan yahay mas'uulka ugu sarreeya Shirkadda.
2. Magacyada oo dhameystiran, taariikhda dhalashada, jinsiyadda iyo ciwaanka deggenaansho ee qareenka ama qareennada asaasay.
3. Nuqulka shahaadada iyo rukhsadda qareennimo ee qareenka ama qareennada asaasay iyo qareennada ka hawl-gala xafiiska, oo lagu bixiyay si waafaqsan Sharciga Qareennada, Sharci Lr. 85 ee 21 Oktoobar 1975 iyo wax-ka-beddelkiisa Sharci Lr. 3 ee Janaayo 1986.
4. Heshiiska asaaska ama qoraal sharciyeedka dhisidda shirkadda adeega sharci.
5. Caddeyn ku saabsan cinwaanka shirkadda ama lahaanshaha goobta shaqada; iyo

6. Dokumentiyada iyo xogta ku cad faqradda (1) ee qodobkan, waa in lagu gudbiyaa si dhammeystiran, sax ah, oo waafaqsan tilmaamaha maamulka ee ay soo saarto Waaxda Arrimaha Garsoorka ee Wasaaradda.
7. Codsi kasta oo aan buuxin shuruudaha kor ku xusan waxaa loo aqoonsanayaa mid aan dhammaystirnayn, laguna diidi karo diiwaangelinta rasmiga ah.

## Qodobka 9aad:
## Dhisid iyo Diiwaangelin Shirkad Shisheeye

1) Waxaa aasaasi kara shirkad shisheeye hal ama in kabadan, qareenno shisheeye oo loo ogolaaday inay kaga hawlgalaan gudaha JFS mihnada sharcig, iyo haddii qareenada shisheeye dawladahooda asalka ah sidaa oo kale u ogol yihiin qareenada Soomaaliyeed.
2) Waa in saamileyda shirkada qeyb ka yahay ugu yaraan hal qareen Soomaaliyeed oo heysta rukhsad qareen si waafaqsan Sharciga Qareennada Sharci Lr. 85 ee soo baxay 21 Oktoobar 1975 iyo wax-ka-beddelkiisa Sharci Lr. 3 ee Janaayo 1986.
3) Ka hor inta aan la hawlgelin shirkad shisheeye oo bixisa adeeg sharci oo cusub, waa in laga diiwaangeliyaa Wasaaradda.
4) shirkadda shisheeye waa in ay u keentaa qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Agaasimaha waaxda Garsoorka wasaarada si uu ugu ogolaado diiwaangelin, iyada oo la dhowrayo shuruudaha ku cad qodobka 8aad ee Xeer-nidaamiyahan oo lagu daray;
    a) Magaca saxda ah oo ay shirkadu qaadatay;
    b) Qaabka shirkada looga aqoonsanyahay sharciga wadanka lagu aasaasay, haddii shirkadu tahay mid ka diiwaangashan wadan kale asal ahaan;
    c) Ciwaanka xarunteeda dhexe;
5) Codsi kasta oo aan buuxin shuruudaha ku xusan qodobka 8aad iyo 9aad waxaa loo aqoonsanayaa mid aan dhammaystirnayn, laguna diidi karo diiwaangelinta rasmiga ah.

## Qodobka 10aad:
## Shirkadaha Horey u Jiray

1) Dhammaan shirkadaha bixiya adeegyada sharciga ee horey uga hawlgalayay dalka ka hor dhaqangalka Xeernidaamiyahan waa inay iska diiwaangeliyaan Wasaaradda, muddo lixdan (60) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda dhaqangalka Xeernidaamiyahan.

**2)** Shirkad kasta oo aan muddadaas gudaheed isku diiwaangelin waxaa loo aqoonsanayaa inay ku shaqeynayso si sharci darro ah, waxayna Muteysanaysaa tallaabooyin Anshax-marineed sida ku xusan Xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 11aad:
## Faafinta Liiska Shirkadaha Adeegyada Sharciga

1) Kaddib soojeedinta Waaxda Arrimaha Garsoorka, muddo sagaashan (90) maalmood gudahood laga bilaabo dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan, wasaaradda waxay soo saaraysaa liiska dhammaan xafiisyada shirkadaha ee si sharci ah uga hawlgala JFS, kuwaas oo u hoggaansamay shuruudaha iyo waajibaadka ku cad Xeer-nidaamiyahan.
2) Liiska Shirkadaha waa in la gaarsiiyo hay'adaha dawladda iyo muwaadiniinta Soomaaliyeed iyada oo la adeegsanayo Mareegta Wasaaradda.
3) Shirkadaha ku qoran liiska rasmiga ah oo keliya ayaa xaq u leh in magacyadooda iyo sumaddooda lagu isticmaalo maxkamadaha dalka iyo hay'adaha dawladda marka ay bixinayaan adeeg kasta oo mihnad sharciyeed ah.
4) Liiska rasmiga ah waa in si joogto ah loo cusboonaysiiyaa.

## Qodobka 12aad:
## Cusboonaysiinta Diiwaangelinta

1. Diiwaangelinta lagu bixiyay si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan wuxuu jirayaa muddo hal (1) sano ah oo ka bilaabmaysa taariikhda la bixiyay, haddii aan la hakin ama aan dib looga noqon, taariikhda dhicitaankana waxaa lagu caddaynayaa shahaadada diwaangelinta.

2. Shirkadda bixisa adeegga sharciga, waa in ay soo gudbisaa arji cusbooneysiin ah ugu dambeyn soddon (30) maalmood gudahood, kadib dhicitaanka Shahaadada diwaangelinta.

3. Shuruudaha cusboonaysiinta waxaa loo marayaa Habraaca diinwaangelin ee ku cad qodobka 8$^{aad}$ ee xeer-nidaamiyahan.

## Qodobka 13aad:
## Kormeer

Wasaaradda, waxay leedahay awood buuxda oo ay ku kormeerto, ku baarto, kuna hubiso xafiisyada shirkadaha adeegyada sharci si loo xaqiijiyo waafaqsanaanta Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee Dalka.

## Qodobka 14aad:
## Anshax-marin

1. Shirkad kasta oo jebisa ama ka gaabisa fulinta waajibaadyada ku xusan Xeer-nidaamiyahan waxaa laga qaadayaa tallaabooyin Anshax-marineed oo kala duwan, kuwaas oo kala ah:
   a) Digniin rasmi ah oo qoraal ah;
   b) Hakin hawlaha shirkada muddo cayiman;
   c) Xiritaan shirkada;
2. Tallaabooyinka Anshax-marinta waa in lagu saleeyaa culayska iyo dabeecadda jebinta Xeer-nidaamiyahan, iyadoo la tixgelinayo ilaalinta danaha bulshada iyo sharafta xirfadda qareennimada.

## Qodobka 15aad:
## Xilliga Kala-guurka

Saddex (3) bilood ka dib marka uu dhaqangalo xeer-nidaamiyahan, looma oggola cid aan diiwaangashaneyn ama aan haysan rukhsad in ay ka hawlgalaan si toos ah ama si dadban gudaha Dalka.

## Qodobka 16aad:
## Dhaqangal

Xeernidaamiyahan wuxuu dhaqangalayaa marka ay Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS ansixiyaan, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

# Lifaaqa koowaad

**Jadwalka kowaad**

**Khidmadaha diiwaangelinta shirkadaha**

| **Codsadaha** | **Khidmadda** | **Waqtiga** |
|---|---|---|
| Shirkad bixisa adeeg sharci oo maxalli ah. | $300-dollar ama shilling Soomaali u dhigma. | 3 maalmood |
| Shirkad bixisa adeeg sharci oo shisheeye | 1,000 dollar ama shilling Soomaali u dhigma. | 5 maalmood |

# Lifaaqa labaad

Qaababka codsiga diiwaangelinta, codsiga wax-kabedelka, codsiga cusboonaynsiinta iyo codsiga diiwaangelinta shirkadaha shisheeye waa sidatan:

1. **Qaabka 1[aad]:**

   Qaabka Isdiiwaangalinta shirkadaha sharciga

2. **Qaabka 2[aad]:**

   Qaabka Codsiga Cusbooneysiinta

3. **Qaabka 3[aad]:**
   Qaabka Codsiga Waxkabadelka Shirkadda
4. **Qaabka 4[aad]:**

   Qaabka Codsiga Diiwaangelinta Shirkadaha Shisheeye

WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Qaabka 1aad:**

**Qaabka Isdiiwaangalinta shirkadaha sharciga**

1. Magaca Shirkadda: ____________________________________
2. Lambarka Diiwaangelinta (haddii uu jiro): ___________________
3. Ciwaanka Xafiiska: _______Magaalada: ____ Gobalka: _______
4. Taariikhda La Aasaasay: ___/____/____
5. Nooca shirkada Sharciga (shirkad / shuraako / xirfadle kaligiis);
6. Shuraakada/Aasaasayaasha Qareenada (ku lifaaq haddii ay ka badan yihiin hal adigoo isticmaalaaya habkan):

   Magaca Qareenka: ________________ Rukhsadda: ________ _

   Jinsiyadda: _______Taariikhda Dhalashada: ___/____/____

   Cinwaanka (address) deegaanka: ________________________

7. Liiska Qareenada ka shaqeeya shirkada (ku lifaaq haddii ay ka badan yihiin hal adigoo isticmaalaaya habkan):

   Magaca Qareenka: ________________ Rukhsadda: __________

   Xilliga uu shaqo bilaabay: ___/____/____

8. **<u>Bayaanka codsadaha</u>**:

   Anigoo ah qofka hoos ku saxeexan, waxaan caddaynayaa in xogta lagu sheegay codsigan ay run tahay oo ay dhammaystiran tahay;

   Magaca: _________ Saxiixa: _______Taariikhda: ___/___/___

9. Ku lifaaq codsiga dokumentiyada soo socda:

a) Nuqulka rukkasdda qareenka aasaasaha ah, ama qareenada Aasaasayaasha ah;
b) Nuqulka shahaadada diiwaangelinta shirkadda.
c) Caddaynta cinwaanka diiwaangashan (address);
d) Heshiiska ama dokumentiga lagu dhisay shirkadda.

**Wasaaradda**

Lambarka Codsiga: __/___/___ Lr. diiwaangelinta: _______________

Lr. Shahaadada la soo saaray: ____/____/_______________________

Diyaariyey:

Magaca:_______________________ Saxiixa_____________________ Agaasimaa Arrimaha Garsoorka: ___________Saxiixa: _____________

WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Qaabka 2aad:**

**Qaabka Codsiga Cusbooneysiinta**

1. Magaca Shirkadda: ___________________________________
2. Lambarka Diiwaangelinta: ______________________________
3. Ciwaanka Xafiiska shirkada: _____ Magaalada: ____Gobalka: ___
4. Ma jiraan wax isbeddel ah oo ku dhacay kuwan soo socda laga soo bilaabo diiwaangelintii u dambaysay ama dib u cusboonaysiinta u dambaysay?

   a) Magaca shirkadda: ☐ Haa ☐ Maya: Hadday (Haa) tahay, qor magaca cusub: ____________________________________________

   b) Deegaanka: ☐ Haa ☐ Maya: Hadday (Haa) tahay, qor deegaanka cusub: ____________________________________________

   Nooca shirkada sharciga (shirkad / shuraako / xirfadle kaligiis): ☐ Haa ☐ Maya Hadday (Haa) tahay, qor qaabka cusub: _______________
5. Liiska qareennada shatiga leh ee ka shaqeeya: ☐ Haa ☐ Maya: Hadday (Haa) tahay, ku lifaaq liiska la cusboonaysiiyay
6. Liiska Qareenada ka shaqeeya shirkada (ku lifaaq haddii ay ka badan yihiin hal adigoo isticmaalaaya habkan);

Ku lifaaq dukumeentiyadan oo la cusboonaysiiyay:

a) Rukhsadda qareennada oo ee la cusboonaysiiyay;

b) Ciwaanka deegaanka la cusboonaysiiyay;

c) Isbeddel kasta oo ku saabsan lahaanshaha ama dokumentiga saami-qeybsiga xubnaha;

7. **Bayaanka codsadaha**;

Anigoo ah qofka hoos ku saxeexan, waxaan caddaynayaa in xogta lagu sheegay codsigan ay run tahay oo ay dhammaystiran tahay;

Magaca: __________ Saxiixa: ________Taariikhda: ___/___/___

**Wasaaradda**

Codsiga cusboonaysiinta la helay: _/__/__Lr. Cusboonaysiiyey Shahaadada: ____/____/____

Diyaariyey:

Magaca:_______________________ Saxiixa_____________________

Agaasimaa Arrimaha Garsoorka: ___________Saxiixa: _____________

WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Qaabka 3aad:**
**Qaabka Codsiga Waxkabadelka Shirkadda**

**1.** Magaca Shirkadda: ___________________________________
**2.** Lambarka Diiwaangelinta: _______________________________
**3.** Xogta isbeddeshay ( sax dhammaan kuwa khuseeya):
   a) Magaca shirkadda ( )
   b) Cinwaanka diiwaangashan ( )
   c) Cinwaanka ganacsiga ( )
   d) Nooca shirkada sharci: shirkad/shuraako/ xirfadle kaligiis ah ( )
   e) Liiska qareenada rukhsadda leh ee ka hawlgala ( )
   f) Qaab dhismeedka saamiqeybsiga ama lahaanshaha ( )
   g) Mid kale; _________________________________________
**4.** Bixi tafaasiisha cusub (goob kasta oo kor lagu so saxay):

a) Magaca Cusub: _______________________________________

b) Ciwaanka Cusub ee Diiwangashan: _________________________

c) Ciwaanka cusub ee shirkada: _____________________________

d) Nooca shirkada Sharci ee Cusub (shirkad/shuraako/xirfadle keligiis ah):__

e) Liis cusub oo qareeno rukhsad leh (ku lifaaq liiska haddii ay badan yihiin):

f) Magaca buuxa: _________________ lamberka rukhsadda: ______

g) Taariikhda Ogolaanshaha: ____/____/____

h) Lahaanshaha/saamiqeybsiga la cusboonaysiiyay (ku lifaaq jadwalkan):______________

   h) Isbeddellada kale: _________________________

**5.** Taariikhda isbeddelka: ___/____/____
**6.** Sababta isbeddelka: _____________________________

7. **<u>Bayaanka codsadaha:</u>**

Waxaan halkan ku cadeynayaa in xogta kore ay sax tahay, waxaana aan ku soo gudbin doonaa dhammaan dukumeentiyada taageeraya isbeddelka ee loo baahan yahay.

Magaca: ___________________Saxiixa: _______________ Taariikhda: ____/____/____

8. Ku lifaaq dukumeenti la cusboonaysiiyay sida ku habboon:
   a) Nuqul shahaado muujinaysa beddelka magaca/nooca shirkada sharciga
   b) Caddaynta ciwaanka cusub
   c) Rukhsadda qareenada oo la cusboonaysiiyay
   d) Jadwalka lahaanshaha/wadaaga la cusboonaysiiyay
   e) Iyo waxkle haddii ay jiran: _____________________________

**<u>Wasaaradda</u>**

Diyaariyey:

Magaca:_______________________ Saxiixa_____________________

Codsiga baddelidda: __/__/__ Lr. Diiwaanka la Cusbooneysiiyay: __/_/_

Agaasimaa Arrimaha Garsoorka: ___________Saxiixa: _____________

WASAARADDA CADAALADDA IYO ARRIMAHA DASTUURKA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTIONAL AFFAIRS
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Qaabka 4[aad]:**

**Qaabka Codsiga Diiwaangelinta Shirkadaha Shisheeye**

1. Magaca buuxa ee Codsadaha (Qofka Ajnabiga): _______________
2. Jinsiyadda: __________________________________________
3. Baasaboorka / Lambarka Aqoonsiga: _______Dalka Bixinaya: ___
4. Taariikhda Dhalashada: / /____ Meesha dhalashada: ____
5. Ciwaanka Dalka asalka: _________Magaalada: ____Dalka: ____ Koodhka Boosta / ZIP: _______________
6. Ciwaanka Xafiiska / Laanta JFS (haddii ay khusayso): ________ Magaalada: ______ Gobalka: ____ Koodhka Boostada: _______
7. Ciwaanka (Email-ka): ________ Taleefan: _________
8. Magaca shaqa-wadaaga maxaliga ah ama wakiilka sharciga ah ee Soomaaliya: _____Dhalashada: _______ rukhsadda/ Diiwaangelinta Lamr: ________
9. Magaca Shirkadda / Laanta (haddii ay khusayso): ____________
10. Nooca shirkada Sharciga ee shisheeye: ☐ Shirkad Shisheeye ☐ Xafiis Laan ☐ shuraako ☐ Xafiis wakiil ☐ Mid kale;
11. Taariikhda La Aasaasay: _/_/_
12. Magaca(yada) Qareenada rukhsadda Ajaanibka ah ee la shaqeeya Shirkada (ku lifaaq haddii ay ka badan yiihin hal adigoo isticmaalaaya habkan):
    a) Magaca: _______________Lambarka rukhsadda: _________ Dalka: ____
    b) Magaca: _________________Lambarka shatiga: ________ Dalka: _________________
13. Ku lifaaq dukumeentiyada soo socda (meesha ay khusayso)
    I. Nuqulka baasaboorka codsadaha
    II. Caddaynta rukhsadda ama diiwaangelinta (dalka hooyo) ee Codsadaha ama Shirkadda
    III. Shahaadada ka mid noqoshada/diwaangelinta shirkada (dalka Asalka)

iv. Awoodda Qareenka / Warqadda Oggolaanshaha ee wakiilka degaanka ee JFS
v. Soo jeedinta ijaarka xafiiska ama caddaynta ciwaanka ee JFS
vi. Liiska qareennada ajnabiga ah iyo kuwa maxalliga ah ee la xiriira shirkadda/laanta
vii. Dukumeenti kale oo khuseeya: __________

14. Codsadaha ama Shirkaddu waligeed ma lagu soo rogay tallaabo anshaxeed, cunaqabatayn ama anshax-xumo mihnadeed oo xukun kasta ah?

☐ Haa ☐ Maya: Hadday Haa tahay, ku soo lifaaq faahfaahin buuxda;

________________________

**15. Bayaanka codsadaha**

Waxaan halkan ku caddaynayaa in macluumaadka lagu bixiyey codsigan uu yahay run oo dhammaystiran inta aqoontayda ah.

Saxeexa Codsadaha: __________Taariikhda: ____ / ____ /____
Magaca Saxiixayaasha: _________
Xilka: _____________

**<u>Wasaaradda</u>**

Lr. Codsiga: ___/____/___ Lr. diiwaangelinta:______

Lr. Shahaadada la soo saaray:___/____/____

Diyaariyey:

Magaca:______________________ Saxiixa____________________

Agaasimaa Arrimaha Garsoorka:____________Saxiixa: _________